

TODDOBAADKA GANACSIYADA BILOWGA AH EE TWIN CITIES EE 2021

September 17-24, 2021



TCSW

Waa maxay TCSW?

Toddobaadka Ganacsiyada Bilowga ah ee Twin Cities (TCSW) waa xaflad toddobaad soconaysa, oo ay kasoo dhex muuqdaan hoggaamiyeyaal mufakariin ah oo ka socda Minnesota iyo meelo ka baxsanba. Iyada oo loo marayo munaasibado 200+ ah oo daboolaya dhammaan dhinacyada ganacsiga, laga bilaabo teknoolajiyadda ilaa farshaxanka iyo dhaqanka, waxaan isku xirnaa hal-abuureyaasha, hoggaamiyeyaaasha shirkadaha waaweyn, iyo dadka xiiseeya ganacsiyada bilowga ah.

TCSW waa meesha lagu sahmiyo hal-abuurka Minnesota, loogu dabaaldego ganacsiyada bilowga ee deegaankeena, laguguna dhiirrigeliyo inaad bilowdo dedaalkaaga!

Uaa ka qeybgalaya?

Waxaan aaminsanahay in gees kasta oo kamid ah Minnesota, uu joogo jabsade (hacker), ganacsade, injineer, farshaxan-yaqaan, iyo dhise kaas oo ay dedaaladiisu kobciyaan badqabka dhaqaalaha gobolka.

TCSW waxay martigelisaa kumanaan qof oo ka qeybgalayaal ah, laga bilaabo aasaasayaasha iyo maalgashadayaasha ilaa xubnaha warbaahinta. Dhammaan ganacsatada, hal-abuurayaasha, iyo dadka xiiseynaya ganacsiyada bilowga ah waa la soo dhaweynayaa!

Sida aad uga qeybqaadan kartid

Waxaa jira siyaabo badan oo aad uga qeybqaadan karto TCSW!

Haddii ay tahay mutadawacnimo, martigelin waddo, ama kaliya keenista asxaabtaada munaasibada, TCSW waa dedaal bulsheed mana hirgelin karno adiga la'aantaa

- [Foomka mutadawacnimada](#)
- [Foomka maalgelinta](#)
- [Liiska iimeylka](#)

KA QEYBQAL!

Waxaa jira hal milyan oo sababood oo aad uga qeybgali karto TCSW, laakiin waxaan kuu qori doonaa dhowr kamid ah:

- La xiriirida bulshada hal-abuurka leh ee Twin Cities
- Kalfadhiyo, aqoon isweydaarsiyo, iyo munaasibado khaas ah oo iftiiminaya mowduucyada ay kamidka yihiin laga bilaabo iibinta & suuqgeynta ilaa cuntada & ag
- Bandhigyada farshaxanka & dhaqanka iyo xarumaha bulshada ee soo bandhigaya hal-abuuraada ugu wanaagsan ee Twin Cities ee dadka reer Minnesota laga bilaabo ganacsisyada bilowga ah ee deegaanka, farshaxan-yaqaanada, iyo hoggaamiyayaasha mufakarka ah ee u dabaaldegaya bulshada hal-abuurka leh ee ku nool Twin Cities iyo meelaha ka baxsanba.

[HEL TIKIDHADAADA TCSW 2021 MAANTA!](#)

MARTIGELI KALFADHI!

TCSW waa munaasibad bulshadu hogaamiso waxayna ka kooban tahay ugu horeyn kalfadhiyada bulshada iyo munaasibadaha khaaska ah ee lala yeesho shuraakada bulshada. Martigelinta munaasibadu waxay ka koobnaan kartaa wada-sheekaysiga dabka agtiisa ilaa aqoon isweydaarsiyada casriga ah, miiska xaruunta bulshada ilaa xafladda teknoolajiyadda.

Wax badan ka ogow ka qeybqaadashada TCSW 2021 adigoo eegaya [gormadayada macluumaadka kalfadhiga](#).

MAALGELI!

TCSW waxa suurtageliyay maalgeleinta shirkadaha waaweyn, tabarucaadka shuraakada bulshada, iyo iibka tigidhada. Waxa jira heerar badan oo kala duwan oo taageero ah, oo ay kamid yihiin Suurtogelinta in Barnaamijkayaga Loo Soo Duulayaa uu Hirgelo - oo aan soo duulino dadka ka kala yimid daafaha adduunka si ay u soo arkaan waxa ay Twin Cities hayaan - si ay qeyb uga noqdaan qeyb dhan oo ganacsi inta lagu jiro toddobaadka.

Haddii aad xiiseynayso inaad na taageerto, [halkan](#) wax badan kaga baro heerarka maalgelinta.

WADAAG!

Haddii aad taqaan qof maalgelin kara TCSW, la wadaag tan! Waxaad sidoo kale la wadaagi kartaa degelkayaga, iyo waliba barahayaga bulshada.



TCSW

**TODDOBAADKA GANACSIYADA BILOWGA AH EE
TWIN CITIES EE 2021**

September 17-24, 2021